OREGON DEPARTMENT OF **Human Services**

# Farriinta Agaasimaha

Farriintan waxaa la soo gelin doonaa onlaynka iyadoo ku qoran af اللغة العربية, English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文 iyo Tiếng Việt.

---

**Taariikhda:** 29-ka Janaayo, 2026

**Ku socoto**: Xubnaha bulshada ee Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon (ODHS), danwadaagta iyo shaqaalaha

**Ka socoto:** Liesl Wendt, Agaasimaha, Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Oregon

**Mawduuca:** **Agaasimaha ODDS waa la doortay**

Ma nabad baa.

Waxaan ku faraxsanahay inaan idiin sheego in Acacia McGuire Anderson (iyada/ayada) ay tahay agaasimaha cusub ee Xafiiska Adeegyada Naafada Koboceed (ODDS). Maalinta ay shaqada bilaabayaa waa Febraayo 18.

Waad ku mahadsan tahay Darlene O'Keeffe muddada aad sii ahayd agaasimaha ku meelgaarka ah ee ODDS. Waad mahadsan tihiin maamulayaasha iyo hawlwadeenada dadaalka badan muujiyey dhawrkii sano ee tagay. Waad mahadsan tihiin xubnaha bulshada, danwadaagta iyo hawlwadeenada ka qaybqaatay hannaanka doorashada. Jawaabcelintiina ayaa ka caawisay kooxdeena raadintu inay doortaan Acacia.

Waanu ku faraxsannahay in Acacia ku soo laabatay ODHS. Waxay u leedahay aqoon baaxad wayn iyo dareen qoto dheer bulshada naafooyinka garasho iyo koboceed ee Oregon (I/DD). Nolosheeda oo dhan waxay ka shaqaynaysay adeegyada naafooyinka. Waxay wakhtigeeda u hurtay la shaqaynta shakhsiyaadka iyo qoysaska si ay u siiso adeegyo qofku udub-dhexaad u yahay oo tayo leh.

Acacia waxay shaqadeeda kaga bilawday xirfadle taageerada tooska ah Montana. Kadib markay ka qalinjabisay Willamette University ee Salem, waxay ka noqotay maamule barnaamij aagga Portland. Waxay soo maamushay barnaamijyada shaqaalaynta I/DD iyo taageerada maalintii. Markii dambe waxay soo qabatay jagada isku-duwaha adeegyada ee Degmada Multnomah.

Waxay Acacia ku soo biirtay ODDS 2013. Waxay ka soo qabatay jagooyin badan ODDS, sida isku-duwaha ogaanshaha iyo qiimaynta, maamulaha shaqaalaynta iyo u-qalmidda, isku-duwaha Employment First, iyo agaasime-xigeenka kumeel gaarka ah ee ODDS. Waxay maaraysay mashaariic muhiim ah, sida baahinta Impact Oregon, jawaabta COVID-19 iyo maalgalinta Xeerka Qorshaha Samato-bixinta Ameerikaanka.


2023, Acacia waxay rabtay inay wax badan ka barato adeegyada dawladda hoose iyo adeegyada bulsho ee kale. Waxay noqotay maamulaha isdhexgalka caafimaadka iyo guryeynta ee Degmada Clackamas. Waxay ka shaqaysay inay dhisto barnaamijyo ka caawiyo dadka waajahaya guryo la'aanta inay helaan adeegyada iyo taageerada daryeelka caafimaadka.

Acacia waxay ku faraxsan tahay inay ku soo laabatay ODHS si ay u hoggaamiso shaqadeena ah hubinta shakhsiyaadka qaba I/DD inay baraaraan iyagoo ah xubno bulshadooda qiime ku dhex leh. Waxay rajaynaysaa inay ka shaqayso dhisidda xiriiro cusub iyo dib ula xiriiridda naftooda-u-doodayaasha, qoysaska, hawlwadeenada iyo danwadaagta.

Mahadsanidin, mar labaad, dhammaantiin kuwiina gacan ka gaystay hannaanka doorashada. Haddii aad qabto wax su'aalo ah ku saabsan hannaankaas, kala xidhiidh Shaqaaleeyaha Sare ee ODHS Surbhi Singh iimaylka surbhi.singh@odhs.oregon.gov.

Waxaan rajaynayaa inaan kala shaqeeyo hawlwadeenada, danwadaagta iyo bulshada I/DD koritaanka iyo horumarinta adeegyada iyo taageeradeena.

Nabadgelyo,



Liesl Wendt

Agaasime

Waaxda Oregon ee Adeegyada Aadanaha

---

Waxaad dukumintigaan ku heli kartaa si bilaash ah isagoo ku qoran luuqado kale, far waawayn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad ku dooneyso. Iimayl ku soo dir dd.directorsoffice@odhs.oregon.gov ama wac 503-945-5811. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka maqalku ku adag yahay.

Khayraadka

- Isku diiwaangeli wargelinada ODDS.
- Wax ka ogow dhacdooyinka ODDS.
- Isku diiwaangeli wargelinada Adeegyada Aadanaha ee Oregon.
- Akhri farriimo ka socdo ODDS.
- Naga soo raac Facebook @oregondhs.idd